Haddii aad danaynayso inaad wax badan ka barato Xog ururinta Sinaanta, Kala Duwanaanshaha, iyo Ka mid ahaanshaha (EDI), fadlan booqo mareegtayada.

Xafiiska Sinaanta Daryeelka Caafimaadka waxa uu qabanayaa Xog ururinta Sinaanta, Kala Duwanaanshaha, iyo Ka mid ahaanshaha (EDI) si loo sii fahmo horumarka iyo caqabadaha hay'adayada kala kulantay ka dhigidda hay'ada mid ka dhan ah cunsuriyadda. Su'aalaha badanaa la iska waydiiyo xog ururinta ayaa looga jawaabay hoos.

## Maxaa la iigu dhiirigelinayaa inaan dhamaystiro Xog ururinta Kala-duwanaanshaha Sinnaanta, iyo Ka mid Ahaanshaha?

- Waxaan u baahannahay inaan qof walba ra'yigiisa maqalno
- Waxaan aqoonsanahay in shakhsiyaadka ka soo jeedo umadaha aan la matalin iyo kuwa la takooro ay caqabad ka horjoogsan karto dhamaystirka xog ururintan
- Natiijooyinka xog ururintan waxaa loo isticmaali doonaa in lagu hago shaqada OHCE iyo shaqada kooxo gaar ah, oo ay ku jiraan kuwa maamuleed, kuwa caafimaadeed, iyo qaybaha akademiyeed ee UW Medicine iyadoo aan ku dadaaleyno inaan noqono hay'ad ka dhan ah cunsuriyadda.
- Ka qaybqaadashadaadu waxay lagama maarmaan u tahay horumarka EDI
- Inta badan waynu ku guul daraysannaa inaynu helno ra'yiga shakhsiyaadka caadiyan la takooro oo codkoodu muhiim yahay marka hay'addu ku dadaalayso inay ahaato mid ka dhan ah cunsuriyadda.
- Sinnaanta waa qayb muhiim ah oo ka mid ah shaqadayada UW Medicine
- Si aanu horumar u samayno, waxaan u baahannahay inaani si fiican u sii fahamno jawigeenna hadda.

## Yaa lagu casuumay inuu xog ururintan sameeyo? Ma qasab baa?

Dhammaan shaqaalaha UW Medicine, oo ay ku jiraan waaxaha, shaqaalaha, iyo tababartayaasha ayaa lagu martiqaadi doonaa inay dhamaystiraan xog ururinta. Qofna kuma qasbana inuu buuxiyo xog ururinta, waxaadna ka boodi kartaa su'aal kasta oo ku jirta xog ururinta haddii aad doorato inaadan ka jawaabin.

## Goorma ayaa xog ururintan la heli doonaa?

Xog ururinteena waxaa la qaadan doonaa onlayn laga bilaabo 17[ka] Janaayo ilaa 28[da] Febraayo 2023.

## Dhererka iyo Waqtiga Xog ururinta

In la dhamaystiro xog ururinta waxay qaadan doontaa, celcelis ahaan, wax aan ka badnayn 15 daqiiqo. Waxaad awoodi doontaa inaad bilowdo oo aad joojiso xog ururinta haddii aadan haysan waqti aad ugu dhameysato hal fadhi.  Waxaad dooran kartaa inaad ka boodo su'aalaha aadan rabin inaad ka jawaabto.

## Maxaa ku jira Xog ururinta EDI?

Xog ururinta waxaa loola jeedaa in lagu aqoonsado jaangooyaasha halbeegga ah ee Sinnaanta, Kala duwanaanshaha, iyo Ka mid ahaanshaha ee UW Medicine oo dhan iyo in la helo xog lagu tallaabo qaadi karo si ay gacan uga geysato kala mudnaansiinta aagagga shaqada ee heerarka hay'adeed iyo waaxeed. Xog ururintan waxay diiradda saari doonaa sida aqoonsiyada shakhsiyeed ee kala duwan, (sida Sinjiyadda, qowmiyadda, jinsiga, jinsiga, naafanimada, iwm.), ay u qaabeeyaan khibradda shaqaalaha marka ay joogaan UW Medicine. Waxa ku jira su'aalo ku saabsan waayo-aragnimada sinnaan la'aanta, ka mid ahaanshaha, ka tirsanaanta.

## Maxaa xog ururintan loo abuuray? oo kuna soo aadiyay hadda?

UW Medicine waxaa ka go'an horumarinta fayo-qabka iyo raali ahaanshaha xirfadlayaasha daryeelka caafimaadka. Xog ururintan cusub waa tallaabada ugu horraysa ee wareeg horumareed adag oo ay ka qeyb yihiin dhammaan shaqaalaha UW Medicine ee ka hawlgala dhammaan hay'adaha ee nidaamka. Jawaabahaagu waxay naga caawin doonaan inaan qaadno talaabooyinka xog-ogaal ah si aan u wanaajino deegaankeena gacanna uga geysanno hagidda heer-nidaam wanaajineed.

## Sidee baa xog ururinta loo maamulayaa?

Xog ururinta waxaa lagu maamuli doonaa iyada oo la adeegsanayo RedCap, oo ah agab maamulid xog ururineed, xog-kaydineed, iyo warbixineed dhinac saddexaad uu maamulo oo onlayn ah. Agabka xog ururineed ee RedCap waa agab ku dhisan onlayn ahaan ee lagu abuuro laguna maamulo xog ururinta onlaynka ah. Xogta laga helay xog ururinada la dhammeeyey waa la kaydin doonaa iyadoo la isticmaalayo agabka xog-kaydinta ee Microsoft Access ee kumbiyuutar ilaalsan oo eray-sireed lagu xiray, oo galidiisa dad khaas ah ku kooban yahay kuna jiro xafiis qufulan oo ku yaal goob la xaddiday. Xogtaada shakhsiyeed ee lagugu aqoonsan karo ee la xiriirta xog ururinta EDI waxa heli karaa oo keliya shaqaalo ITHS ee xaddidan ee loo magacaabay inay maareeyaan xogta muddada maamulka xog ururinta oo keliya. Kadib marka muddadani dhammaato, dhammaan xiriirada u dhexeeya shakhsiyaadka buuxinaya xog ururinta iyo xogta lagu aqoonsa karo shakhsiyaadka waxa burburin doona dhexdhexaadiyaheena daacadda ah ee dinaca saddexaad.

## Jawaabahaygu ma yihiin kuwo qarsoon?

**Haa, xogta gaarka ah ee lagu aqoonsan karo qofka lalama wadaagi doono UW Medicine sabab kastaba ha jirtee.** Xogta loo sii daayo ujeedo kasta oo la ansixiyay ayaa had iyo jeer laga saari doonaa aqoonsiga iyadoo la tirtirayo xog kasta oo lagu aqoonsan karo shaqsi oo ay ku jiraan isku-dhafka tirada dadka, waaxda, ama darajada akadeemiyadeed oo waxaa loo wadarayn doonaa kooxo aan ka yarayn toban.

## Sideen u ilaalin doonnaa qarsoodida xogta?

Ma sahlanno walaacyadaada asturnaanta/qarsoodida waxaanan rabnaa inaad si dareen qanacsanaan leh oo daacad ah uga jawaabto.  Si loo kala sooco Xafiiska Sinaanta Daryeelka Caafimaadka iyo xogta jawaabaha aan la lafagurin ee  xog ururinta, xog ururinta waxa maamuli doona Machadka Ka Miro-dhalinta Sayniska Caafimaadka (Institute for Translational Health Sciences) iyadoo hoos imaanaysaa dhinac saddexaad. Heshiiska dhexdhexaadiyaha daacadda ah ayaa qeexaya in ITHS ay ilaalin doonto qarsoodida aqoonsiga ka qaybqaatayaasha oo aysan sinnaba ugu siidayn doonin macluumaadka Xafiiska Sinaanta Daryeelka Caafimaadka xaalad.

Intaa waxaa dheer, xogta gaarka ah ee lagu aqoonsan karo qofka lalama wadaagi doono qofna. Dhammaan warbixinnada iyo xogta ku jirta dashboodkha waxa loo maarayn doonaa si loo ilaaliyo qarsoodida ka qaybqaatayaasha xog ururinta. Gaar ahaan, natiijooyinka waxaa loo soo bandhigi doonaa kaliya qaab guudmar ah (wadareed) si aan qofna loogu aqoonsan sifooyinkiisa gaarka ah - waxaan kaliya wadaagnaa natiijooyinka kooxo jawaabayaal oo gaaraya 10 ama ka badan.  Kooxaha ka kooban jawaabayaal ah 10 ama wax ka yar, jawaabaha waa la baabi'iyaa.  Marnaba jawaabaha xog ururinta ee heer shakhsiyeed ah lama soo bandhigi doono.

## Sida loo buuxiyo Xog ururinta

Casuumad iimayl ah oo ka timid Drs. Casuumad iimayl ka timid Drs. Tim Dellit iyo Paula Houston iyaga oo isticmaalaya ciwaanka iimaylka OHCE@uw.edu ayaa loo diri doona dhamaan shaqsiyaadka loogu talogalay

Janaayo 17, 2023, iyaduu uu la socdo linkiga xog ururinta onlaynka ah. Qof kasta oo ka tirsan hay'adda waxa la siin doonaa linki u gaar ah oo xog ururinta ah iyada oo loo soo marinayo iimaylkooda UW. Xusuusin iimaylka oo muddaysan, oo sita isla linkiga iimaylka, ayaa loo diri doona kuwa aan xog ururinta buuxin ilaa 28[da] Febraayo, 2023, marka xog ururintu xiranto. Xog ururinta waxa lagu dhamayn karaa hal fadhi ama fadhiyo badan iyadoo la isticmaalayo isla linkiga.

## Waxaan leeyahay naafonimo igu adkeynaysa helitaanka macluumaadka boggan. Natiijooyinka xog ururinta ma lagu heli karaa qaab kale?

UW Medicine waxaa ka go'an inay bixiso jawi onlayn ah oo qof walba geli karo, oo ay ku jiraan shakhsiyaadka naafada leh. Haddii aadan geli karin macluumaadkan ama aadan isticmaali karin sifada mareegtan, fadlan iimayl u dir callieh@uw.edu si aad ugu hesho qaab kale.

## Ma jiraa qof iga caawin kara dhammaystirka xog ururintan?

Haa.

## Ma ku qaadan karaa xog ururinta taleefankayga casriga ah ama mobaylkayga?

Haa.

## Yaan la xiriiraa hadaan qabo su'aalo iyo walaacyo?

Fadlan kala xiriir Maamulaha Mashruuca, Callie Hunter (callieh@uw.edu) wixii su'aalo ah. Callie waa qofka ugu horeeeya ee inaad la xiriirto ah. Waxa kale oo aad la xiriiri kartaa xubin kasta oo ka mid ah guddiga hawsha.